Myndigheten för samhällsskydd och beredskap

XAQIIQ

OKTOOBAR 2012

KA HORTAGA DABKA

# Su’aalo iyo jawaabo ku saabsan dabka ka kaco guryaha

**Waraaqadaan warbixinta waxaa ka helaysaa su’aalo iyo jawaabo ku saabsan dababka ka kaco guryaha. Su’aalooyinka waxaa loo kala qeybiyay toddoba arrimood.**

**Qalabka dab damiska = Wakhti gudihiis ku badbaadi naf & hanti**

**Waa maxay saababta ey u wanagsan tahay inoo gurigeeyga haysto qalabka digniinta dabka?**
Dabka dhaqso buu ku faafi. Dhowr daqiiqo gudaheeda buu al qol dab wada noqonkara oo qiiq sun ah ka buux sa mi. Dhaqsidaas ma kugu soo garikaran shaqalaha dabdemiyaasha. Qalabka digniinta dabka waqti fiican bu digniin ku siin - sidaa noloshaada u baadbaadin kartid, sidaa bulshada digniin u siin kartid iyo bilaabikartid inaa damisid dabka.

**Maxaa aniga suubinkara oo iskaga difaacikara inoo gurigeeyga dab ka dhalan?**
Waa inaa haystaa qalabka digniinta dabka oo shaqeeynaayo. Soo dhigo guriga bustaha dabka iyo haanta dab damiska sidaa dababka yaryar u daminkartid. Kana sii fikiir wax yaabaha aad suubinkartid hadii xaalada ey degdeg noqoto. Qoyska ka wada hadla waxaa suubineeysiin hadii oo dab bilaawdo.

**Yaa ka ah mas’uul in la geliyo guriga aan ku noolahay qalabka digniinta dabka?**
Waxay ku habboon tahay in cidda guriga mulkigiisa lihi ay geliso qalabka digniinta dabka. Adigana waxaa masuul ka tahay, inaa qalabka digniinta dabka shaqeynaayo ka warhaysid. Waa in aad si joogto ah, kolba wakhti go’an, u fiirisaa, in uu shaqeynaayo iyo in kale.

**Halkee ku xiraa qalabka digniinta dabka gurigaa ku noolahay?**
Ku xir qalabka digniinta dabka saqafka sare oo qolka jifka agteeda.

**Waayo lagu xiri qalabka digniinta dabka qolka jifka agteeda?**
Qalabka digniinta dabka waxaa loogu talo galay in ey hurdada kaa kiciyo sidaa noloshaada u badbadin kartid iyo bulshada kale oo noloshooda halis ku jirto. Qiica hurdo ka ma kicinaayo. Hadii adiga oo hurdaayo aad ku neefsatid qiicaas ma heleeysiid fursad aad noloshaada ku badbadisid. Qiica dabka dhaqso buu ku faafi oo hadi dhowr yeer ku neefsatid miyir la’aan buu kaa dhigi.

**Waayo lagu xiri qalabka digniinta dabka saqafka hore?**
Qalabka digniinta dabka waxuu dareemi qiica dabka. Qiica kulul kor buu dhiqsi aadaa. Qalabka digniinta dabka qiicas buu dareemi oo adigna digniint buu ku siin waqti fiican.

**Ku saabsantahay Waraaqada Warbixinta**
Waraaqada warbixinta waa kaalmad loogu talagalay adiga oo rabtid inaa tustid koox dad ah filimka la dhaho *Gurigaada baa gubanooyo.*

Calaamaddani waxeey micnaheedu tahay warbixin la socoto dababka ka kaco fillooyinka ama guryaha isdaba yaalka ah/*radhus*.

MSB-89.5

**Halkee baan ku xirayaa qalabka digniinta dabka, haddii aan ku noolahay guri ka kooban dabaqyo kala sareeya?**
Ku xir qalabka digniinta dabka saqafka sare ee meesha jaranjarada ah ee loo marayo dabaqa kore. Haddii uu dab ka kaco dabaqa hoose, si ay dadka kan sare joogaa, wakhti hore u helaan digniin.

**Sidee baan u kontorooli karaa in qalabka digniinta dabka uu shaqeynayo iyo in kale?**
Qalabka digniinta dabka waxaa uu leeyahay badhan. Riix badhanka. Haddii aad waxba maqli weydo, bedel batariyaada.

**Qalabka dab damiska noocee baan u baahan ahay in aan guriga ku haysto?**
Waxaa jira noocyo kala duwan oo qiimo aad u kala duwanna leh. Haanta dab damiska ee qaada 6 kilo budo ah, kuna calaamadeysan: 43A 233B C waa maalgashi fiican. Waxay damin kartaa dababka yaryar ee ay sababbaan waxayaabo kala duwani.

**Daminta dabka ka dhasho shoolladda cunto kariska = Sidee baan aniga yeelaa?**

**Sidee baan u daminayaa dab ka dhashay saliid cunto oo shoolladda kor saaran?**
Waxaad dabka kaga xiraysaa hawada dabooll, bustaha dab damiska loogu talogalay, shukumaan/towaal iyo waxyaabo la mid ah. Haddii aad biyo ku shubtid dab ka dhashay saliid cunto, waxaad halis u tahay in aad is dhaawacdid iyo weliba in uu dabku faafo.

**Qixiid**
**Waayo u joogi aniga gurigeeyga oo ilbaabka u xiraan hadi oo qiic sun ah jaranjarada dabaqa ka buux samo?**
Qiica dabka aad buu sun u yahay. Hadii aad u soo baxdid dabaqa jaranjaradiisa oo qiica dabka ku neefsatid miirka baa ka tagaayo iyo waa dhiman. Sidaas daraaded gurigaada ku jiir. Gurigaada noloshaada weey ku baadbadikarta ilaa 30-60 minit. Soo wac 112 si ey shaqaalaha dab damiska ula socdaan inaa gurigaada ku jirtid.

**Miyaa gurigeeyga ku jirikara hadi meel kale dabaqa dab ka shiidmo?**
Haa, adiga waa inaa joogta gurigaada. Habka gurigaada u dhisan yahay baa loogu talagalay dabka kaa difaacikaro 30 ila 60 minit. Shaqaalaha dab damiska weey ka soo gaaraayan, dabka daminaayaan iyo ku caawinaayaan adiga. Shirkadaha guryaha dhiso weey ku qasban yihiin in ey dhisaan guryo oo dabka iska celinkaro 30 ila 60 minit sida oo sharciga dhigaayo.

**Waa maxay sababta ey u fiicaantahay in ilbaabka gurigeeyga laga soo galo xiro hadii uu gurigeeyga dab ka kaco?**
Hadii aad xirtid ilbaabka gurigaada qiica dabka gurigaada kama soo baxaayo, oo kuma faafaayo jaranjarada dabaqa. Sidaas baa ku baadbadinkarta dariskaada iyo ku caawisay shaqaalaha dab damiska.

## La soo xiriir Hey'adda difaaca bulshada iyo heegan ahaanshada


651 81 Karlstad

Telefoonka: 0771-240 240
Fax: 010-240 56 25

registrator@msb.se
www.msb.se

Shaqaalaha la soo xiriireysid:
Anders Lundberg
Telefoonka: 010-240 52 59

Alexandra Johansson
010-240 50 56

anders.lundberg@msb.se
alexandra.johansson@msb.se

**Qiiqa dabka = khatar buu ku yahay naftaada**

**Maxaa ku dhacaya jirkayga haddii aan nuugo qiiqa dabka?**
Waxaa ku jira qiiqa maadooyin, si dhakhso leh u sumaynaysa jirkaaga, kedibna aanad noqonaynin caadigaagii. Dhowr naqas oo qiiq oo aad jiidid ayaad ku miyir beelaysaa. Waxayna u dhici karaa si dhakhso ah. Qiiqa kululli waxaa uu gaarsiiyaa neef mareenada iyo sambabadaba dhaawac culus.

**Waa maxay maadaddaha ku jira qiiqa?**

- Maadadda *kolmonoxid* ayaa raacaysa unugyada dhiigga ee cascas/guduudan, waxayna hor istaagaysaa naqaskii ogsajiintii lagama maarmaanka u ahayd, in la gaarsiiyo dhammaan hareeraha kala duwan ee jirkaaga.
- Maadadda *koldioxid,* waxay ciriirri gelinaysaa hawadii lagama maarmaanka ahayd ee ogsajiinta, waxayna dhalinaysaa taasi, in maskaxdu xirto dareemayaasha neefsiga.
- Qeybo dambas ah, kuwaasi oo xaniba suurtogalka ay sambabadu ku gaarsiin lahaayeen jirka hawada ogsajiinta ah.

**Maxaan samaynayaa haddii uu qiiq ku bato meesha aan joogo?**
Qiiqa khatarta ah kor sare buu u baxaa, sidaas awgeed, waa in aad hoos ka martaa qiiqa. Gurguurro dhulka korkiisa. Halkaas baad si sahlan, waxna uga arkaysaa, ugna naafsan kartaa.

**Maxaan samaynayaa haddii aan nuugay naqas qiiq ah?**
La xiriir hay'addaha daryeelka caafimaadka, si ay kuugu sameeyaa baaris iyo qiimeyn. Haddii uu kugu adag yahay neefsigu, islamarkiiba wac 112.

**Namberka gurmadka degdeg ah 112 = Halkan waxaa laga helayaa gargaar**

**Goorma ayaan wacayaa 112?**
112 waa nambar aad wici karto, haddii aad u baahan tahay in si degdeg ah laguugu soo gurmado, tusaale ahaan, haddii adiga ama cid kale oo uu dhowi ay gubatay, xanuun degdeg ahi ku soo booday, shil baabuur dhacay ama faldambiyeed xoog la adeegsaday uu dhacay.

**Goorma ayaa uu 112 furan yahay?**
Mar kasta oo aad wacdid nambarka gurmadka degdeg ah ee 112. Way ka jawaabayaan maalin iyo habeen, fasax iyo maalmaha caadiga ahba. Lacag la'aan baad ku waci kartaa 112 telefoonka caadiga iyo moobiilkaba.

**Gargaar noocee ah baa la soo dirayaa, haddii aan waco 112?**
Cidda numbarka 112 kaaga jawaabaysa ayaa go'aaminansa nooca gargaarka ay soo dirayaan. Waxay noqon karaaa gaadiidka bukaan-socodka, booliis, dabdamis ama badbaadda baddaha.

**Maxay doonayaa in ay ogaadaan shaqaalaha ka jawaaba number 112?**
Shaqaalaha ka jawaaba numberka gurmadka ee 112 waxay doonayaan in ay ogaadaan:
Waa maxay waxa dhacay?
Waa halkee adreeska wax ka dhaceen?
Teleefanka baad ka soo wacaysaa?

**Miyaan ku wici karaa 112 xitaa haddii lacagtii iigu jirtay kaarka moobiilka ay dhammaatay?**
waad ka wici kartaa 112 teleefanka moobiilka xitaa haddii kaarta lacagtii kuu jirtay ay dhammaatay. Uma baahnid in aad garaacdo numberka furaha goobta ee toos baad u garaacaysaa 112!

**Miyaa soo waci karaa 112 haddii aanan ku hadlin luqada iswiidhshka?**
Sida caadiga ah waxaa lagu la hadlaa af iswedhshka iyo af-ingriisi, si ay shaqaaluhu kuu fahmaan, una soo diraan gargaarka loo baahan, sida ugu dhakhsaha badan. Haddii wakhtigu ogolaado, shaqaalaha gurmadku, waxay gacan weydiisanayaa turjubaan, laakiin waxay daahinaysaa wada hadalkiinii.

## La soo xiriir Hey'adda difaaca bulshada iyo heegan ahaanshada


651 81 Karlstad

Telefoonka: 0771-240 240
Fax: 010-240 56 25

registrator@msb.se
www.msb.se

Shaqaalaha la soo xiriireysid:
Anders Lundberg
Telefoonka: 010-240 52 59

Alexandra Johansson
010-240 50 56

anders.lundberg@msb.se
alexandra.johansson@msb.se

**Sidee bay u shaqeeyaan hay'adda adeegga badbaadintu**

**Wakhti intee leeg bay qaadanaysaa, inta uu gargaarku iga soo gaarayo?**

- Wakhtiyo kala duwan bay qaadataa, inta hawl wadeennada adeegga badbaadintu ay soo gaarayaan meesha wax ka dhaceen. Sababtuna waxay tahay, in aynu ku kala nool nahay meello ka kala fogfog xarunta dab damiska.
- Haddii aad deggen tahay magaalo, gurmadku waxaa uu kugu soo gaarayaa qiyaas ahaan 10 daqiiqo.
- Bulshooyinka yaryar ee baadiyaha ku nool, waxay qaadataan wakhti intaas ka dheer, waayo, waxay ka fog yihiin xarunta dab damiska.

**Sidee bay hawladeennada badbaadintu ii nabadgelinayaan, haddii aan ku nool ahay guri ku yaal korka ugu sareeya aqalka dabqyada ah?**

Hawl wadeennada badbaadadu waxay haystaan wiishash gaari kara ilaa dabaqa 8:aad. Haddii aad deggen tahay, intaas ka kor, waxaad isticmaalaysaa jaranjaro dabka amaan ka ah, oo loogu talogalay aqallada dhaadheer.

**Sidee baan u caawin karaa hawl wadeennada badbaadinta, marka ay hawshooda wadaan?**

- Ku sugnow goobta ay xireen gadasheeda. Waxay hubinayaan in aan wax dhaawac ahi ku soo gaarin.
- Hawl wadeennada badbaadinta waxaa loo tababaray inay badbaadiyaan dadka. Waxaad ku caawin kartaa wixii warar ah ee ku saabsan cidda guriga deggen iyo macluumaad ku saabsan qaabka uu u samaysan yahay gurigu.
- Haddii aad og tahay in qof ku jiro gudaha guri gubanaya, waa qasab in aad u sheegto shaqaalaha goobta jooga.

Faahfaahin dheeraad ah ka akhriso
www.dinsakerhet.se/brand
sida dabka la iska difaac iyo ka fiirso filimka ku saabsan dababka ka kaco guryaha.

## La soo xiriir Hey'adda difaaca bulshada iyo heegan ahaanshada

651 81 Karlstad

Telefoonka: 0771-240 240
Fax: 010-240 56 25

registrator@msb.se
www.msb.se

Shaqaalaha la soo xiriireysid:
Anders Lundberg
Telefoonka: 010-240 52 59

Alexandra Johansson
010-240 50 56

anders.lundberg@msb.se
alexandra.johansson@msb.se